Australian Government

COVID-19 VACCINATION

# Sida ilmaha loogala hadlo tallaallada COVID-19

Markii ugu dambeysay ee la cusbooneysiiyay: 8 Ogos 2022

Tallaalka ayaa sidoo kale lagula talinayaa qaar ka mid ah carruurta da'doodu u dhaxayso 6 bilood ilaa 4 sano kuwaas oo si ba'an u ah immunocompromised (difaaci jidhkooda oo liita), ama naafo ah, iyo sidoo kale kuwa leh xaalado caafimaad oo adag iyo/ama xaalado badan oo kordhinaya halista COVID-19 daran. Waa dabiici in ilmahaagu uu xiiseeyo oo uu su'aalo badan ka qabo tallaallada COVID-19. Waa kuwan qaar ka mid ah talooyin ku saabsan la hadalka carruurta ka hor iyo ka dib marka ay qaataan tallaalka.

Waa muhiim inaad la socotid talooyinka caafimaad ee ugu dambeeyay ee laga heli karo **website-ka Waaxda Caafimaadka iyo Daryeelka Dadka Da'da** ah.

Waxa kale oo aad kala hadli kartaa wixii welwel ah ama su'aalo ah oo aad ka qabtid tallaalka COVID-19 bixiyahaaga ama dhakhtarkaaga ka hor inta aanu ilmahaagu qaadan tallaalka.

Waa muhiim in la dhagaysto jawaabahooda oo la qiro cabsi kasta oo ay ka qabaan tallaalka.

- Ii sheeg waxa aad ilaa hadda ka taqaanid tallaalka COVID-19.
- Weligaa ma qaadatay tallaal ka hor?

Fursadaha ayaa ah in ilmahaagu horey u qaatay tallaal waxaana laga yaabaa inaaney sidaa usii xumaan.

U sharax si daacad ah iyo si da'da ku habboon waxa aad ka ogtahay tallaalka COVID-19.

Xasuusnoow carruurtu waxay ka qaataan tilmaamo niyadeed oo ka imanaya dadka waaweyn, markaa cabsida la wadaago waxaa laga yaabaa inaaney ahayn mid wax dhisaysa oo laga yaabo in ilmahaaga ku dareensiiso raaxo darro.

U sharax in dhakhtarka ama xirfadlaha caafimaadku ay su'aalo weydiin doonaan ilmahaaga, in ilmahaagu qaadan doono irbad gacanta (ama lugaha haddii ay da'doodu u dhaxayso 6 bilood ilaa 5 sano jir) inay dareemi doonaan mudac yar iyo halka irbaddu ka mudey waxaa laga yaabaa in xoogaa xanuun ah ka dib. U xaqiiji ilmahaaga adigoo u sheegaya inay caadi tahay inuu xoogaa ku xanuunsado meesha irbaddu ka gashay, waxayna la macno tahay daawadu way shaqaynaysaa.

Haddii ilmahaagu u muuqdo mid ka walaacsan in la tallaalo, isku day inaad dareenkooda sii baadho ama talo dheeraad ah ka raadso dhakhtarkaaga haddii loo baahdo.

## Ka jawaab su'aalaha ilmahaaga

U diyaarsid jawaabaha saaxiibtinimo ee carruurta si aad u heshid su'aalo kasta oo ilmahaagu qabo. Waa kuwan qaar ka mid ah su'aalaha muhiimka ah iyo jawaabaha laga yaabo inay ku caawiyaan wada hadalkan:

Isticmaal tusaalooyin dhab ah, sida ilaalinta awoowayaasha ubadka, iyo in aad awood u yeelatid inaad sii waddid samaynta waxyaabaha ay ka midka yihiin inaad tagtid dugsiga iyo ciyaaraha kooxda haddii aad u malaynaysid inay tani ku caawinayso.

Australiya gudaheeda, waxaa si fiican u tijaabisay hay'ad hubisa in dawooyinka oo dhan ay badbaadsan yihiin. Dadka lama siin lahayn haddaanay nabad ahayn.

Haddii ilmahaagu ka baqayo irbadaha, diyaarinta wax ku oolka ah iyo farsamooyinka mashquulinta ayaa muhiim ah.

Carruurta da'doodu tahay 5 sano iyo wixii ka weyn, waxaa laga yaabaa inay ku caawiso inay tagaan goob yar, oo aad loo yaqaan, sida farmashiyaha maxaliga ah ama rugta guud. Meelaha waaweyn ee tallaalka ayaa laga yaabaa inay buuq badan yihiin oo mashquul yihiin oo ay kordhiyaan cidhiidhiga.

Soo qaado waxyaabaha uu ilmahaagu jecel yahay ama buugaagta si aad u abuurto khibrad togan iyo carqaladayn.

Horay ula socodsii bixiyahaaga haddii ilmahaagu ka baqayo irbadaha si ay wakhti ku filan u qoondeeyaan oo ay u hubiyaan in habsocodka aan lagu degdegin ama lagu khasbin.

Waxaad booqan kartaa **Waaxda Caafimaadka iyo Daryeelka da'da websaydka** www.health.gov.au wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan tallaalka.

Waxaad wici kartaa Khadka Caawinta Tallaalka Coronavirus iyo COVID-19 ee Qaranka **1800 020 080**. Riix ikhtiyaarka 8 ee adeegyada turjumaada bilaashka ah.

Haddii aad dhego la'dahey, ama aad leedahay wax maqal ama hadal ah, waxaad wici kartaa Adeegga Gudbinta Qaranka **133 677**.